**Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guue ee Qaramada Midoobey u qaabilsan Soomaaliya, Michael Keating, oo Golaha Ammaanka u Xog-warramay**

**New York, 19 Abriil 2016**

Mudane Madaxweyne, sharaf ayey ii tahay inaan halkaan la joogo Mudane Xasan Sheekh Maxamud, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya. Ii ogolow inaan qiro wada-shaqeynta iyo saaxiibtinimada aan laalaabka lahayn ee uu ii fidiyey, iyo inaan aqoonsado doorkiisa hoggaamineed ee xilligan muhiimka u ah taariikhda Soomaaliya.

Markii ugu dambeysey ee aan idin hor imaado waxaan xilka hayey dhowr maalmood oo qura. Markaasna waxaan idiin sheegay in guul lagu tillaabsado sannadka 2016-ka ay ku xirnaan doonto hadba sida looga faa'ideysto fursadaha geeddi-socodka siyaasaddu la yimaado. Dhowrkii todobaad ee la soo dhaafay, madaxweynaha iyo hoggaamiyeyaasha Soomaalidu sidaas ayey sameeyeen. Waxaana la gaaray horumar – in kastoo uusan ahayn lagama noqdaan – yididiile xambaarsan.

Mudane Madaxweyne, todobaadkii la soo dhaafay, hoggaamiyeyaasha Soomaalida, oo ka kooban dowladda faderaalka ah iyo maamullada xubnaha ka ah, waxay gaareen heshiis ku saabsan hannaanka loo isticmaalayo doorashooyinka la qorsheeyey sannadkan dabayaaqadiisa.

Guushan muhiimka ah ee la gaaray waxay dhabbaha u xaareysaa in la sameeyo qorsheyn dhab ah. Waxaan bogaadinayaa rag-ka-roonida hoggaamiyeyaasha Soomaalida. Waxaan sidoo kale soo dhaweynayaa wadahadalka Dowladda Federaalka ahi la furtay Puntland, si wax looga qabto tabashooyinkeeda ku aadden heshiiskii Garoowe lugu saxiixay 3-dii Abriil, kaas oo lugu gorfeeyey halka loo socdo.

Hannaanka doorashadu wuxuu bixinayaa saadaal muujineysa sannadka 2016-du ka duwanaan doono 2012-kii. Ergada wax dooraneysaa boqol jibaar ayry ka badnaan doonaan tiradii hore. Waxaa jiri doona musharraxiin rabitaan run ku imaanaya. Cod-bixintu sidii horay u dhici jirtey markaan kama dhici doonto Muqdisho oo kaliya, laakiin waxaa la iska soo dooran doonaa mid kasta oo ka mid ah caasimadaha maamullada ama fadhiyada dowlad goboleedyada federaalka ku jira iyo kuwa abuurmaya. Qaab-dhismeed labo addinle ah oo ka kooban wakiillo heer federal iyo mid goboleed ah ayaa fulinaya nidaamka. Haweenkana waxaa loo qoondeeyey 30% kuraasta baarlamaanka.

Waxyaabo badan ayaa dhiman in la qabto muddo gaaban gudaheed. Tusaale ahaan, go'aanka bogaadinta mudan ee 30% kuraasta baarlamaanka dumarka loogu qoondeeyey ayaa laftiisu lamahuraan ka dhigaya, in marka hore la isla meel-dhigo kuraas cayiman oo si isku dheellitiran haween qura ah ugu baratamaan. Haddana ballanqaadkan ficil looma beddeli karo haddii hilba-qaybsiga lugu saleeyo hab qabiil. Laakiin marka dhan kale laga eego, waxaa horumar weyn ah in tabargelinta haweenku ay meel sare uga jirto hoggaamiyeyaasha Soomaaliyeed hiigsanayaan.

Marka Golaha Wasiirradu meelmariyaan go'aanka Madashada Hogaanka Qaranka, arrintu waxay u gudbi doontaa Baarlamaanka Federalka ah. Waxaan ugu baaqeynaa Baarlamaanka in ay dedejiyaan ansixinta hannaanka si uu u suurtogeliyo in wakhti kooban lugu jirgeliyo.Waxaan soo dhaweynayaa sii socoshada u jajabnaanta madaxda Soomaalida ku tiigsanayaan filashada Golaha ee ah, in uusan jiri doonin wax muddo kororsi ah oo dhaafsiisan xilliga dastuurku xaddidey.

Hannaanka doorashada 2016 waa mid aan xaqiiqdii horay u dhicin oo mar-la-arag ah. Dareen kasta oo lugu cabiro waa kala barka doorashooyinkii 2012, markaas oo 135 codbixiye ay soo xuleen 275 Xildhibaan, iyo 2020 oo lugu wado in Soomaalida oo dhan cod yeelanayaan. Waxaana socota hawl bartilmaameedkaas lugu tiigsanayo. Hoggaamiyeyaasha Soomaalidu waxay isku raaceenin ay qaataan wadiiqo siyaasadeed oo ku beegan 2016 illaa 2020, sida diiwaangelinta codbixiyeyaasha, calaamadeynta soohdimaha, taabbagelinta guddi madaxbannaan oo arrimaha doorashooyinka maamula, iyo diyaarinta sharuuc hawlahan la xiriira, oo ay ku jiraan dhismaha xisbiyada siyaasadda.

Mudane Madaxweyne, waxaa jira arrimo badan oo taagan. Hawlaha maamul u sameynta gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Hoose waxay la kulmeen caqabdo keenay dib-u-dhacyo. Beesha caalamku waxay u heellan tahay in ay taageerto heshiis loo dhan yahay oo ay gaaraan qabiilooyinka labada gobol. Waxaan rajeyneynaa in dhismaha maamulka xiga uu si dhakhso leh u hirgeli doono. Tanina waxay dhabbaha u xaareysaa in lagu heshiiyo aayaha caasimadda.

Horumarka laga gaarey hannaanka doorashadu wuxuu soo jiitey dareen baaxad leh. Dib-u-eegista farsamo ee dastuurka qabyada ah ayaa billowday. Akhriskii koowaad ee wax ka beddelka dastuurka ayuu baarlamaanku billaabay bishii Fabraayo. Waxaa hadda gobollada ka socda wadatashiyo.

Ka hadalka arrimaha siyaasadeed ee muranku ka taagan yahay ayaa la qorsheeyey in lugu lafaguro kulanka Madasha Hoggaamiyeyaasha Qaranka ee qabsoomi doona bisha May. Intaas ka dibna waxaa la guda-geli doonaa kulan 10 maalmood oo xiriir ah soconaya oo looga hadlayo dastuurka, kaas oo ka dhici doona magaalada Garoowe.

Hawshani waxay ka dhigan tahay fursad taariikhi ah oo u soo hoyatay guud ahaan ummadda Soomaaaliyeed, taas oo ay uga qaybqaadan karaan qaabeynta aas-aaska siyaasadda iyo sharciga ee dalka. Arrimaha waaweyn qaarkood ka hadalkoodu wuxuu ku xirnaan doona in laga hadlo doorashada ka dib. Laakiin waxaa haddaba sii jira horumarro la taaban karo. Sharciga iyo kala dambeynta iyo aakibkooda oo ah Dastuurka Federaalka ah, ayaa si adag u dammaanad qaadi doona xasilloonida iyo dimuqraadiyadda Soomaaliya ee mustaqbalka fog.

Mudane Madaxweyne, horukacan wuxuu socdaa iyadoo ay jirto amnidarro – taasina waa sabab kale oo keeni karta in geeddi-socodku dib u laabto. Ciidan iyo shacab badan ayaa weli dhimanaya. Al-Shabaab weli waa khatar muuqata. Guluf dagaal oo bartamahii Maarso Al-Shabaab ku qaadeen Puntland, ayaa muujiyey nugeylka Waqooyiga. Wuxuu kale oo tooshka ku ifiyey meel-ka-dhacyada askareynta carruurta ee Al-Shabaab ku kacaan – taas oo aad u wax laga xumaado ah. Dagaalkaas waa la xakameeyey ka dib markii Puntland oo kaashaneysa Dowladda Federaalka ay tillaabo deg-deg ah qaadday.

In kasta oo khasaare badan soo gaarey, Al-Shabaab waxay sii wadaan fulinta weerarro toos ah iyo kuwo dadban. Waxay isku dayayaan in ay carqaladeeyaan hannaanka doorashada oo ay u arkaan mid ka hor imaanaya ajendahooda. Waxaan bogaadinayaa geesinimada AMISOM iyo ciidamadooda, iyo dhiirranaanta ciidamada ammaanka ee Soomaaliya iyo shacabkoodu ay kala hortageen Al-Shabaab. Waxay u baahan yihiin una qalmaan taageeradeenna.

Iskaashiga seddex geesoodka ah ee Dowladda Soomaaliya, Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobey, wuxuu laf-dhabar u yahay dhismaha nabadda iyo dowladnimada Soomaaliya.

Waxaa i dhiirrigelinaya heellanaanta AMISOM iyo dalalka ciidamada ugu yaboohay ay muujiyeen, ka dib shirkii ay ku yeesheen Jabuuti bishii Fabraayo. Waxaa kale jira garowshiyo la xiriira in

taliska ciidanka iyo xarumahaba la xoojiyo, sida in la taliyaha ciidamada la siiyo waxyaabo u sahlaya fulinta shaqada AMISOM. Waxaan rajeynayaa in taliye cusub uu dhawaan imaan doono.
.
Waxaan hadda ka imid Addis Ababa, halkaas oo shirkii ugu horreeyey ee iskaashiga Midowga Afrika iyo Qaramada Midoobey lugu qabtay. Tani waxay xoojineysaa dadaallada wadajirka ah ee aan kula tacaaleyno hoos u dhaca ku yimid maalgelinta AMISOM, si loo adkeeyo awoodda ay ku sugeyso doorashooyinka.

Aniga iyo Wakiilka Guddomiyaha Midowga Afrika waxaan isla meel dhignay ujeeddooyin cadcad oo ku qotoma qaraarka 2245,waxaana isku raacnay madaxa UNSOSin la dardargeliyo taageerada AMISOM iyo UNSOM labadaba. Waxaa naga go'an inaan fulinno siyaasadda is xilqaanka xaquuqda aadanaha, taas oo looga golleeyahay in sare loogu qaado xurmada xaquuqda bini'aadamka. Karaanka UNSOM waxaa sii xoojinayaa khuburada military eek a socota UK ee bishan dalka yimid

Mudane Madaxweyne, Madaxweynaha Federaalka ah waxaa ka go'an adkeynta awoodda amniga Soomaaliya, taasna Madaxweynaha waan ku ammanayaa, sababtoo ah waa arrin adag oo xasaasi ah islamarkaana muhiim u ah dhismaha dowladnimada iyo ka lib keenidda horumarka. Sidaas darteed, waan ku faraxsanahay in dowladda federaalka ah ay sameysay Siyaasadda Ammaanka Qaranka iyo Qiimeynta Khatarta Qaranka, taas oo sidoo kale lala wadaagey maamullada dalka ka jira. Laakiin weli waxaa wax ka dhimman yihiin sidii qorshe dhaqqale oo waafi ah loogu dejin lahaa ciidamada xoogga, booliska, asluubta iyo garsoorka.

Jadwal siyaasadeed oo leh qaab dhismeed ammaanka qaranka ku qotoma waa in la dhammeystiraa, gaar ahaan booliska, garsoorka asluubta, ku waas oo lugu saleynayo hannaan la jaanqaadi kara daruufaha gaarka ah ee Soomaaliya iyo nidaamka federaalka ah ee dalka loo diyaarinaya.

Waxaan ku faraxsanahay inaan idiin sheego in qaab-dhismeed cusub oo yeelanayo booliska Soomaaliya uu ka soo baxay wadatashigii dhawaan ay yeesheen dowladda federaalka ah iyo maamul goboleedyada dalka ka jira. Qaab-dhismeedkan doorka iyo waajibaadka ay kala yeelanayaan booliska qaranka iyo midka gobollada, iyo qaabka ay ula dhaqmayaan shacabka.

Haddii aan idin la wadaago walaaca uu madaxweynuhu ka muujiyey goos-gooska mushaarka hawlwadeennada ammaanka. Bishii la soo dhaafay, kulan ay yeesheen bahwadaagta caalamiga ah ee dhanka ammaanka iyo Wasaaradda Maaliyadda, si looga wada hadlo isku-duwidda mushaaraadka iyo gunnooyinka, islamarkaana si joogto ah loo bixiyo mushaarka, iyadoo la isticmaalayo diiwaan danabeysan oo mideysan. Waxaa kale oo socda isfaham weyn oo ka dhexeeya bahwadaagta amniga, kaas oo ku fadhiya qaab-dhismeed iyo qorshe mideysan.

Mudane Madaxweyne, dhaqaalaha Soomaaliya wuxuu ku xiran yahay cimilo wacan iyo kartida dadkeeda, ku waas oo ay ku jiraan qurbajoogtu. Dhismaha is aamin weyn iyo xiriir ay wadaagaan dowladda iyo ganacsatada waxaa ka dhalan kara faa'idooyin aad u ballaaran, sida xoojinta hay'ado abuura ammaan la isku halleyn karo, adeegyo ay ka mid yihiin tamarta, waxbarashada iyo farsamada gacanta. Dhammaan hawlahanina waxay keeni karaan fursado dhaqaale oo wax tar u leh ganacsatada iyo dhallinyarada shaqo la'aantu dalka ku hayso.

Soomaaliya waxay horumar ka sameyneysaa maamulka dhaqaalaha. Sharciga la dagaallanka lacagaha la waarido ayaa dhawaan la sixiixay. Kuraas ka bannaanaa Guddiga Bankiga Dhexe

ayaa la buuxiyey. Waxaase weli harsan waxyaabo badan oo u baahan in la fuliyo, sida la dagaallanka musuqmaasuqa iyo dhimista lunsashada maaliyadda, laakiin jihada loo socdo waa mid na dhiirrigelineysa.

Iyadoo tan la garowsan yahay, Hay'adda Lacagta Adduunku waxay todobaadkii hore ku dhawaaqday qorshe lugu kormeerayo dhaqaalaha dalka, taas oo dalka ka caawineysa abuurista geeddi-socod lugu dhimayo deymaha Soomaaliya lugu leeyahay, si markaas ka dib loo gaarsiiyo heer amaah kale lugu siin karo.

Dowladda Federaalka ah ayaa udub-dhexaad u ah hinjinta hindishan. Guusha ay soo hoysana wuxuu faa'ido u keeni doonaa dalka oo dhan, maadaama uu soo jiidan karo maalgashi lugu sameeyo qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha Soomaaliya, taas oo wax weyn ka tareysa hiigsiga himilooyinka ku foogan horumar loo aayo. Waxaan abaal u haynaa Ku-xigeenka Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey oo dalalka daymaha ku leh Soomaaliya ugu baaqay in ay dadajiyaan diyaarinta wadahallo xeeldheer oo lugu qiimeynayo amaahda Soomaaliya, ka dib kulan todobaadkii tagey ka dhacay magaalada Washington.

Mudane Madaxweyne, ammaanka iyo baraaraha Soomaaliya wuxuu ku xiran yahay guusha laga gaaro in kaalmada dalka la siiyo loogu beddalo wax ka qabashada arrimaha gundhigga u ah dhibaatooyinka Soomaaliya, sida tag darrida, colaadda iyo xagjirnimada. Si taas loo gaarana waxaa loo baahan yahay istiraatejiyad isku-duuban oo siyaadaseed, sida taabbagelinta maalgashi dhaqaajiya kobac dhaqaale, shaqo abuurka, waxbarashada, oo ay ku jiraan gabdhaha iyo haweenka, amniga iyo kala dambeynta iyo xurmeynta xaquuqda aadanaha – iyo sidoo kale dhismaha karaanka ciidamada amniga iyo la dagaallanka argagixisada.

Kani waa ajande culeyskiisa leh, laakiin wuxuu u baahan yahay jajabnaan ka timaadda hoggaamiyeyaasha siyaasadda iyo dhaqanka intaba, iyo sidoo kale taageerada bahwadaagta deriska iyo caalamka oo isku duuban. Waxay kale oo loo baahan yahay in wax laga qabto daruufa xilliga dhow.

Daruufahaas waxaa ku jira abaarta iminka saabatay gobollada Somaliland iyo Puntland. Abaartii 2011-kii waxaa ka dhashay macluul horseedday geerida dad gaaraya 260,000 oo qof. Tanina waa in aysan mar kale dhicin.

Marka laga yimaado cunto yarida daran, abaarta oo sii socota waxay saameyn baahsan ku yeelan kartaa amniga — maadaama ay xoojin karto kooxaha xagjirka ah ee hadda gabalkoodu sii dhacay — islamarkaana waxay siyaadin kartaa barakaca iyo qulqulka tahriibayaasha.

Tillaabo deg-deg ah islamarkaana ku habboon wax ka qabashada arrintan waxay baajin kartaa masiibo kale oo dhacda. Dhaqaalaha loo baahan yahay in hadda lugula tacaalo saameynta abaartu wax badan ayey ka yar tahay inta ay ku kici doonto hadhow marka masiibo dhaco – maal iyo magaad midkey noqotaba. Mas'uuliyiinta Soomaalidu waxay sameeyeen guddiyo qaran iyo kuwo goboleed oo dhaqaale u aruuriya gurmadka abaaraha.

Si kastaba ha ahaatee, tani kuma filna wax ka qabashada baahida jirta. Hay'adaha gargaarku waxay heleen US$145 milyan oo ka mid ah $885 codsigii ay wada-jirka u jeediyeen 2016. 31 Maarso, Isku-duwaha Gargaarka Bini'aadamnimada Soomaliya, Peter de Clercq wuxuu diray baaq gargaar dhan US$105 milyan si loo dhiso sanduuq loogu talogalay in looga jawaabo abaarta, taas oo aan uga mahadcelineyno, laakiin aan ku filleyn baahida meesha taal.

Mudane Madaxweyne, Wallow caqabadaha Soomaaliya ku hor gudban ay badan yihiin, haddana horumarka waa dhab, waase la curdun-dharin karaa. Hawlaha dhismaha dowladnimada iyo doorashooyinkuba waxay u nugul yihiin qaswadeyaasha. AMISOM waxay u baahan tahay taageero dheeri ah, mana sii joogi doonto abidkood.

Sidaas darteed, waa inaan sameyno inta karaankeen ah, si aan u xaqiijinno in horumarka lugu tillaabsaday uusan u noqon hal bacaad lugu lisay – in la hubiyo hirgelinta hannaanka doorashada 2016-ka iyo diyaargarowga 2020-ka, dhismaha karaanka ciidamada ammaanka si Soomaalidu mas'uuliyadda ugala wareegto AMISOM, islamarkaana la sbuuro dhaqooyin iyo dhaqaalaha looga baahan yahay dowlad isku filan.

Dadaalkeenna arrimahan la xiriirana wuxuu ku xiran yahay midnimada Golahan, oo aan uga mahadcelinayo. Beesha caalamka, Midowga Afrika, IGAD, Midowga Yurub, dalalka xiriirka labo geesoodka ah la leh Soomaaliya iyo deriska

Waxaan ka dhursugayaa booqashada Golaha ee bisha dambe, si loogu garab istaago hoggaamiyeyaasha Soomaalida dadaalka loogu jiro gaarista mustaqbal ifaya oo Soomaaliya gaarto,

**Mahadsanidiin.**